

Maxaa la filayaa kadib markii la qaato talaalka COVID-19

Daabacaada le heli karo: <https://www.cdc.gov/coronavirus/2019-ncov/vaccines/expect/after.html>

Talaalka COVID-19 wuxuu caawin karaa inuu kaa ilaaliyo qaadida cudurka COVID-19. Waxaa lagayaabaa inaad lahaato qaar waxyeelo ah, taasoo ah calaamadu caadi ah oo ah in uu jirkaadu dhisayo difaac/ilaalin. Waxyeeladaa waxay saameyn ku yeelan karaan sameynta waxqabadyadaada maalin la ah, laakiinse way iska tagayaan dhawr maalmood kadib. Dadka qaarkood malaha wax waxyeelo ah.

Waxyeelada badanaa jira

Lagu arko gacanta lagaaga duray talaalka:

- Xanuun
- Guduudasho
- Barar

Lagu arko jirkaaga oo dhan:

- Daal
- Madax-xanuun
- Murqo-xanuun
- Qarqaryo
- Xummad
- lallabbo

Talooyin caawin leh

Haddii aad leedahay xanuun ama raaxo daro kadib markaad qaadatay talaalka, kala hadal dhkhtaarkaaga qaadashada daawada dukaanka laga iibsado, sida ibuprofen ama acetaminophen.

Si aad dajiso xanuunka iyo raaxo daradda meesha aad taalalka ka qaadatay/lagaa duray:

- Saar goobta dusheeda maro qoyan, qaboob oo nadiif ah.
- Isticmaal ama dhaqdhaqaaqi gacantaada.

Si aad u dajiso raaxo daradda qandhada:

- Cab dareere/cabitaano badan.
- Dar khafiif ah gasho.


Goorma ayaa la wacaa dhakhtarka

Xaaladaha badan kood, raaxo daradda qandhada iyo xanuunka waa wax caadi ah. La xiriir dhakhtarkaaga ama bixiyahaaga daryeelka-caafimaad:

- Haddii guduudnaashaha ama xanuunka meesha aad ka qaadatay irbada/lagaa duray uu sii kordho 24 saacadood kadib
- Haddii waxyeeladaada aad ka welwel santahay ama ay u muuqdaan inaysan tageen dhawr maalmood kadib

Xusuusnow

- Waxyeeladaa waxay saameyn ku yeelan karaan sameynta waxqabadyadaada maalin la ah, laakiinse way iska tagayaan dhawr maalmood kadib.
- Marka ay tahay talaalada COVID-19 qaarkood, waxaad u baahan tahay 2 qiyaas si aad u hesho ilaalinta ugu badan. Waa inaad qaadataa qiyaasta labaad xitaa haddii aad isku aragto waxyeelo qiyaasta koobaad kadib, illaa haddii bixiyaha talaalka ama dhakhtarkaaga ku yiraahdo ha qaad.
- Waxaad kaliya u baahan tahay 1 qiyaas ee talaalka viral vector ee COVID-19, Talaalka Johnson & Johnson Janssen ee COVID-19.
- Jirkaagu wuxuu qaadan wakhti si uu u dhiso difaacid kadib markaad qaadato waxii talaalid ah. Talaalada COVID-19 ee u baahan 2 qiyaas waxaa laga yaabaa inuusan ku ilaalin illaa iyo ku dhawaad labo toddobaad kadib markaad qaadato qiyaasta labaad. Wixii ku saabsan talaalada COVID-19 ee u baahan 1 qiyaas, waxay qaadan illaa iyo labo toddobaad is talaalida kadib si uu jirkaagu u dhiso difaac.
- Kadib marka si buuxda aad isu talaashay, waxaa laga yaabaa inaad awoodo inaad bilaawdo sameynta waxyaalaha aad sameyn jirtay qaarkood ee aad u joojisay cudurka faafa dartiisa. Booqo websaydka CDC si aad u hesho talooyinka ugu dambeeyey www.cdc.gov/coronavirus/vaccines.



Weydii cida ku siisay talaalka wayaalaha ku saabsan isticmaalida v-safe

Isticmaal taleefankaaga-casriga ah si aad CDC ugu sheegto wixii ku saabsan waxyeelada kadib markaad qaadatay talaalka COVID-19. Waxaad sidoo kale heli doontaa xusuusin haddii aad u baahato qiyaas labaad ee talaalka

Ka baro wax dheeraad ah oo ku saabsan **v-safe**. www.cdc.gov/vsafe

BIXIYAHA DARYEELKA CAAFIMAAD, FADLAN BUUXI MACLUUMADKA HOOS KU QARAN:

Haddii uu heerkulkagu yahay _____ °F ama _____ °C ama ka sareeya ama haddii aad qabto su'aalo, wac bixiyahaaga daryeelka caafimaad.

U sheeg bixiyahaaga daryeelka caafimaad wixii ku saabsan: _____

Lambarka taleefanka bixiyahaaga daryeelka caafimaad: _____

Daawada (haddii loo baahdo):

Qaado _____ muddadiiba ee ah _____ saacadood sida loogu baahdo.

(nooca iyo qiyaasta ama tirade)



cdc.gov/coronavirus